

Ballanqaadayaga Sii-jiritaanka (Sustainability)

Waxa Haddaba Sameynayo:

Qaab Dhisme oo Leh Madhxin Tamar (Energy Efficiency) iyo Sii-jiritaan

Madhxin Tamar

Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital waxa u dhammeystiray mashruucyo leh madhxin tamar oo badan oo ah goobtayada. Waxa annu si soke ula shaqeynaa Xcel Energy iyada oo la marayo [Commercial Efficiency Program](#) (Barnaamijka Madhxinta ee Ganacsiga).

Dedaalada Madhxinta:



- Nal ama guluub ah LED: Sannadkii 2020, Hay'adda Abbott Northwestern Foundation waxay maalgalsay mashruuc lagu beddelayo nalalka ama guluubyada ah "fluorescent" oo lagu beddelayo nalal ah LED oo leh madhxin tamar.



- Faro-xal leh qalab dareen leh oo ah goobaha faro-xalka oo lagu rakibay aagaga cusub iyo kuwa la dib loo habeeyay
- Tuubo faro-xal oo qulqul yar oo ah goobaha faro-xalka
- Xakameynta huurka oo la fiicneeyay



- Fiicneyn lagu yareynayo sanqadha dibadda ee ka imanaysa kululeynta, hawo qaboojinta, iyo hawo dhaqaajinta

Dedaalada Kale ee Madhxinta Tamarta:


- Casriyeyn habka maareynta (xukunka) dhismaha
- Casriyeyn qalabka kululeynta iyo qaboojinta
- Casriyeyn guluubyada ama nalalka

Qaab Dhisme oo Leh Sii-jiritaan

Machadka Cilmiga Maskaxda ee la Yidhaahdo Abbott Northwestern Hospital Neuroscience Institute

Sannadkii 2019, waxa u machadka [Abbott Northwestern Neuroscience Institute](#) u furay qaybo badan oo la yidhaahdo *Doing It Right The First Time* (DIRTT (Sameynta Waxa Sax ah Marka Ugu Horeysa) oo ah qaybo leh sii-jiritaan. Hal qayb, oo ah derbiga leh naqshad ah DIRTT, waxa la qorsheeyay iyada oo mustaqbalka maskaxda lagu hayo. Waxa intaa dheer iyada oo derbiyadu yihiin kuwo la rari karo, si loo beddelo marka farsamadu is beddesho, taasoo ka hortagaysa in qashinka derbiga la burburiyo u galo godadka qashinka lagu aaso.

Intii lagu jiray mashruucan:



12,417 rodol oo ah qashin derbi qallalan ayaa laga baajiyay in lagu rido godka qashinka.

Hawada oo lagu sii daayo walxo hawada heehaaba oo dhan 20 rodol oo ka iman lahaa derbi qallalan ayaa la baajiyay.

Derbi ka sameysan waxyaabo dib loo isticmaalo tiro ahaan 72.31% ayaa la dhisay.

Waxyaabaha Leh Sii-jiritaan ee la Muujiyay:

- Derbiyo leh Nadqshad DIRT – oo ah derbiyo la rari karo oo ku yaalla gudaha qollalka bukaanka, oo wax laga beddeli karo hadba marka farsamadu is beddesho
- Naqaska DIRT Flex Gas – oo ah naqaska lagu isticmaalo goobaha caafimaadka oo sii ammaan badan oo leh tuubo jilicsan oo beddel u ah tuubooyinkii ahaa maarta oo mustaqbalka la sii isticmaali doono





Daaqadaha Cisbitaalka Wadnaha ee Abbott Northwestern Heart Hospital

Dhismaha cisbitaalka wadnaha ee Abbott Northwestern Heart Hospital waxa ku dhex yaalla qalab adeeg caafimaad oo kala duwan iyo sariiro bukaan-jiif. Sannadkii 2020, daaqad kasta oo ku taalla dhismaha waa la beddelay si loo kordhiyo madhxinta tamarta. Waxa tan ku jiray ku dhawaad 3000 qaybood oo ah quraarad ama qarsho. Si loo yareeyo saameynta soo gaadhaysa daryeelka bukaan, waxa mashruuca la iskaga dabariday 400 oo goobood oo kala duwan – taasoo macnaheedu yahay in tiro aan ka badnayn 12 qol bukaan aan laga joojin isticmaalka halkii wakhti.

Sii-jiritaanka Adeegga Cuntada

Soo-saarista cuntadu waxay qayb weyn ka qaadataa korodhka naqasyada keena in dunidu kululaato (greenhouse gases). Taasi waa sababta annu u qaadayno waxqabad lagu yareynayo qashinka cuntadayada oo u fiicneynayo meelaha laga keeno cuntada.

Naqaska Dunida Kululeeya (Greenhouse Gas Emissions)

Sodexo waxay adeeg ah cunto siisaa cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital. Sodexo waxay taageertaa Baaqyada Adduunka ee Khayraadka (World Resources Initiatives) ee la yidhaahdo [Cool Food Pledge](#) (Ballanqaadka Cunto Qabow) si loo yareeyo naqaska la xidhiidha cuntada tiro ah 25% marka la gaadho 2030. Waxa annu Sodexo kula shuraakownay [hadafyadooda sii-jiritaanka](#) ee hamiga badan oo u ku jiro in heerarka naqaska kaarboon ee sannadkii 2017 la yareeyo tiro ah 34% marka la gaadho sannadka 2025 iyo in la dhimo qashinka cuntada tiro ah 50% sannadka 2025.

Illaha Adeegga

Allina Health waxay taageerta barnaamijka Sodexo ee ku saabsan illaha laga helo adeeg si loo horumariyo ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe.

Qashinka Cuntada

Marka an wax ka qabano qashinka cuntada, waxa an yareyn karnaa naqasyada dunida kululeeya waxana an taageeri karnaa beesha degmadeena.

Haddaan nahay cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital:

- Cuntada dheeraadka ah waxa an ugu deeqnaa [CommunityBridge](#) (sababta oo ah COVID-19 deeqda cuntada waa la hakiyay)
- Qashinka cuntada waxa loo beddelaa quud xayawaan
- [LeanPath](#), oo ah nidaam lagula socdo qashinka, ayaa la hawlgalin doonaa sannadka 2021.

Goobta The Commons, oo ah Rugta Maamulka ee Allina Health:

- nafaqeeye-dhul oo laga dhigo wixii cunto ama biyoloji

Waan og nahay in aanaanu wali qaban wax ku filan in la yareeyo saameynnada naqasyadu ku hayaan dunideena. Waxa an soo saarnaynaa hadafyo sii-jiritaan oo noo gaar ah si isbeddel waara loogu baahiyo Allina Health. Halkan nagula wadaag warcelintaada iyo fikradahaaga.